

## Waxaa waajibaadka shaqo raadinta ku buuxin kartaa:



1. Markaad codsato shaqo ugu yaraan soconaysa laba toddobaad, taas oo aad si macquul ah u malaynayso in aad u heli karto
  - dalabka boosaska bannaan
  - abuurista shaqo bannaan
  - xiriir toos ah oo lala yeesho shaqo bixiyaha
2. Adigoo codsanaya shaqada gaarka ah oo ku salaysan fursada ay abuurtay degmada
  - waxay noqon kartaa shaqo soconaysa wax ka yar 2 toddobaad
3. Adigoo ka dalbanaya shaqo dheeraad ah shaqo bixiyahaaga
4. Adigoo raadsanaya fursado shaqo ganacsi ah oo aad si macquul ah u filan karto inaad shaqo kaga heli karto
  - xayeysiis ganacsiga u gaar ah
  - xiriir lala yeesho shaqo bixiyaha suuragalka ah
  - ka qayb qaadashada tartamada qandaraasyada
5. Adigoo ku soo bandhigaya Työmarkkinatori
6. Hawlaha kale ee loogu talagalay shaqaalaynta, tusaale ahaan.
  - diiwaan gelinta shaqaalaha ee shirkadda dillaalka shaqada
  - codsiga lacagta caawimada ah ee shaqada
  - faylka aad ku soo bandhigto internet-ka
  - daabacaadda astaanta LinkedIn
  - falalka la taaban karo ee la xiriira bilaabista ganacsiga.

Waajibka shaqo raadinta waad buuxinaysaa haddii aad si joogto ah oo dhammaystiran u shaqeyso ugu yaraan laba toddobaad muddada lagu jiro wakhtiga did u eegista. Haddii shaqadu ay u kala baxdo laba xili oo wakhtiga dib u eegista ah, waxay khusaysaa labada wakhtiba

Shaqo doonka wuxuu ku wargelinayaa gudashada waajibaadka shaqo raadinta taariikhda kama dambaysta ah ee wakhtiga dib u eegista ee adeegga Oma asiointi ama isagoo wacaya tababaraha gaarka ah. Fursadda shaqada aad xaraysata waxaad sheegaysaa taariikhda hirgelinta iyo macluumaadka faahfaahsan, sida booska shaqada iyo shaqo bixiyaha ee la codsaday ama sharraxaadda tallaabooyinka kale ee aad qaaday.

### Waajibaadka codsiga shaqada – oma asiointi

<https://asiointi.mol.fi/omaasiointi/>

1. Gal adeega Oma asiointi.
2. Ka dooro dhamaan **"Kaikki asiointi"** → ka dibna qorshahaaga **"Oma suunnitelma"** → tag qorshaha **"Siirry suunnitelmaan"**
3. Si toos ah ayaad u tegeysaa qaybta suuqyada shaqada (Työmarkkinatori)
4. Tag halka waajibaadka codsiga hawlaha shaqada **"Työnhakuvelvollisuustehtävät"** kana dooro Ogeysii **"Ilmoita"**
5. Liiska khaanadaha hoos u furmaayana ka dooro waxa aad rabto in aad ogeysiiso.
6. Ogeysii cadadka waajibaadka codsiga hawlaha shaqo ee aad rabto, ka dibna dooro Ogeysiinta dir **"Lähetä ilmoitus"**. Xaqiiji ogeysiiska adiga oo dooranaya Ogeysiinta dir **"Lähetä ilmoitus"**.
7. Markaad is ogeysiiso dhammaan waajibaadka codsiga hawlaha shaqada, wixii aad qabatay waxay ka soo muuqanaayaan qaybta waa la Fulliyyey **"Toteutettu"**.